# JIIFINTA ISBITAALKA QOF MASKAXDA KA JIRRAN OO LAGA HELAY MEEL DADWEYNAHA JOOGAAN

(Qaybta 136 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca qaybta iyo isbitaalka | |

## Waa maxay sababta aan isbitaalka la ii jiifiyey?

Waxaa suurto-gal ah inuu isbitaalkaan ku keenay sarkaal booliis sababtoo ah waxay ka wel-welsan yihiin inaad qabtid jirro maskaxeed iyo loo baahan yahay inuu ku arko xirfadlaha caafimaadka maskaxda.

Waxaa halkaan lagugu haayaa sida u qabo qaybta 136 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983 sidii laguu qiimeeyo loona fiiriyo haddii aad u baahan tahay daaweyn.

## Ilaa gormee ayaa halkaan joogi doonaa?

Waxaa halkaan lagugu hayn karaa (ama meel kale ee aad nabadgelyo ku heli doonto) ilaa 72 saacadood sidii uu kuu arko takhtar iyo xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee la aqoonsan yahay.

Xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee la aqoonsan yahay waa qof si gaar ah loo tababarey inay ku caawiyaan go'aamiska haddii dadka u baahan yihiin in lagu haayo isbitaalka.

Haddii takhtarka iyo xirfadlaha caafimaadka la aqoonsan yahay waafiqaan inaad u baahan tahay inaad ku jirto isbitaalka, takhtar kale ayaa laga codsan doonaa inuu ku arko sidii loo xaqiijiyo go'aankooda.

Intii waqtigaan lagu jiro waa inaadan ka tegin isbitaalka aysan ahayn haddii laguu sheego inaad iska bixi karto. Haddii aad isku daydo inaad baxdo shaqaalaha ayaa ku joojin doono, markii aad baxdana, waa lagu soo qaban karaa iyo lagu soo celin karaa.

Haddii takhaatiirta iyo xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee la aqoonsan yahay aysan weli ku arkin 72 saacadood ka dib, waxaad ku fasaxan tahay inaad iska baxdo. Waxaad ku go'aansan kartaa inaad si ikhtiyaar ah ku joogto. Laakin haddii aadan rabin inaad baxdo, marka horey fadlan kala hadal xubin ka mid ah shaqaalaha.

Xaaladdaada 72 saacadood waxay dhammaanayaan:

| Taariikhda | Saacadda |
|---|---|
| | |

## Maxaa dhacayaa oo xigo?

Ka dib markii takhtarka iyo xirfadlaha caafimaadka maskaxda la aqoonsan yahay ku arkaan, waxay sheegi karaan inaad u baahan tahay inaad waqti ka dheer ku jirto isbitaalka. Waxay kuu sheegi donaan sababta iyo dhirirka waqtiga aad ku jiri doontid. Waxaa lagu siin doonaa buug-yare kale ee kuu macnaynaayo wixii dhici doono.

Haddii ay go'aansadaan inaadan u bahnayn inaad sii joogto, qof ayaa kaala hadli doono caawinaad kale ee aad u baahan tahay inaad hesho.

## Miyaan rafcaan soo codsan karaa?

Maya. Xittaa haddii aadan waafiqin inaad u baahan tahay inaad isbitaalka ku jirto, rafcaan kama codsan kartid go'aanka in halkaan lagugu haayo sida u qabo qaybta 136.

## Miyaa daaweyn la i siin doonaa?

Shaqaalaha isbitaalka ayaa ku sheegi doono daaweyn walba ay u maleeyaan inaad u baahan tahay. Waxaad xaq u leedahay inaad diido daaweyn walba ee aadan rabin. Xaalado gaar ah oo kaliya, oo laguu macnayn doono, ayaa lagu siin doonaa daaweyn aadan rabin.

## Ogeysiinta qooyskaaga soke

Nuqulka buug-yarahaan waxaa la siin doonaa qofka uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda u ku aqoonsado inuu yahay qooyskaaga soke.

Waxaa jiro liis ku qoran dad ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda ula dhaqmo inay yihiin qoyskaaga. Caadi ahaan, qofka ugu sareeya liiskaas ayaa lagu magacaabi doonaa inuu noqdo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka wuxuu ku siin karaa buug-yare si fiican kani kuu sharraxaayo iyo ku qoran xuquuqyada uu qoyskaaga soke ku leeyahay daaweyntaada iyo xannaanadaada.

Xaaladdaada markii la fiiriyo, waxaa noola sheegay in qoyskaaga soke uu yahay:

| |
|---|
| |

Haddii aadan rabin inaad hesho nuqulka buug-yarahaan, fadlan u sheeg kalkaaliyahaaga ama xubin ka mid ah shaqaalaha.

## Beddelida magaca qoyska soke

Haddii aadan u malayn in qofkaan u ku habboon yahay inuu ahaado qoyskaaga soke, waxaad codsi ka samayn kartaa Maxkamadda Degmada in qof kale lagu magaacabo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kani kuu sharraxaayo.

## Warqadahaada

Dhammaan warqadaha laguu soo diro  intii aad isbitaalka ku jirto waa lagu siin doonaa. Qof walba ayaad warqad u diri kartaa aysan ka ahayn qof diidey inaad warqad u soo dirto. Warqadaha loo diro dadkaan waxaa joojin karo shaqalaha isbitaalka.

## Shuruud Dabakhaad

Waxaa jiro Shuruud Dabakhaad oo shaqaalaha isbitaalka ku talinaayo Xeerka Caafimaadka Maskaxda iyo sida loola dhaqmo dadka qabo dhiibato maskaxeed. Waa in shaqaalaha tixgeliyaan waxa uu Shuruudda sheegaayo markii ay go’aan ka gaarayaan xannaanadaada. Waxaad weydiin kartaa inaad aragto nuqulka Shuruudda, haddii aad doonayso.

## Sida cabasho loo sameeyo?

Haddii aad rabto inaad ka cabato wax walba ee xiriir la leh xannaanadaada iyo daaweyntaada isbitaalka, fadlan la hadal xubin ka mid ah shaqaalaha.  Waxay awoodi karaan inay xaaladda xalliyaan. Waxay xittaa ku siin karaan faah-faahinta habsocodka cabashada isbitaalka, oo aad isticmaali karto sidii aad isku daydo inaad ku xalliso cabashadaada adigoo u maraayo wax lagu magacaabo xal deegaaneed. Waxay xittaa kuu sheegi karaan qof walba ee kale ee kugu caawin karo samaynta cabashada.

Haddii aadan u malayn in hab-socodka cabashada ee isbitaalka ku caawin karo, waxaad ka caban kartaa Guddii madaxbanaan.  Guddiga wuxuu kormeera sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda, sidii uu u hubiyo in si sax ah loo isticmaalo, iyo in shaqaalaha si sax ah u xannaaneeyaan bukaanlayda intii ay isbitaalka joogaan. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kuu macneynaayo sidii loola xiriiro Guddiga.

### Sidii aad u hesho caawinaad iyo macluumaad dheeraad ah

Haddii uu jiro wax aadan ka garan xannaanadaada iyo daaweyntaada, xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa isku dayi doono inuu ku caawiyo. Fadlan ka codso xubin ka mid ah shaqaalaha inuu kuu sharraxo haddii uu jiro wax aadan ka garanin buug-yarahaan ama haddii aad qabtid su’aalo oo buug-yarahaan ka jawaabin.

Fadlan weydii haddii aad qof kale u rabto  nuqul kale ee buugyarahaan.